

# **Beddelidda Qaabka Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar**

FALANQEYNTA XAALADDA GAARKA AH IYO QORSHAH  
ISTIRAAJIJIGA AH EE DEGMADA KING

 King County

**Best Starts for  
KIDS**



# QAYBTA 1AAD: Warbixinta Bulshada oo Kooban

## Waxyabaha Ugu Muhiimsan “Beddelidda Qaabka Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar”

### Xiriirada waa wadnaha horumarinta aadanaha iyo kobcinta

Dhallaanka, carruurta socod-baradka ah, iyo carruurta yaryar, dhammaan horumarkoodu wuxuu ka dhacaa xiriirada gudahooda. Xiriirada u dhaxeeya carruurta iyo daryeelayaashhooda waxay bixiyaan aasaaska bulsho iyo midka shucureed ee ay carruurta u baahan yihii si ay wax u bartaan una kobcaan noolashooda oo dhan.<sup>1</sup> Takhasuska xad ahaan aadka u yar ee **Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka, iyo Carruurta Yaryar** ayaa haya furayaal badan oo lagu xaqijinayo in carruurta ay ku kobcaan qoys kasta oo ku nool guud ahaan degmada King.

*Warbixintan bulshada ee kooban waa guudmarka warbixinteenne dheer ee Beddelidda Qaabka Caafimaadka Dhimirka Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar: Falanqeynta Xaaladda Gaarka ah iyo Qorshaha Istiraatijiga ah ee Degmada King.*

Sannadkii 2017, hindisaha Best Starts for Kids ayaa bilaabey *falanqeynta xaaladda gaarka ah* si uu wax uga ogado awoodaha, fursadaha, iyo caqabadaha hor yaalla adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar ee guud ahaan Degmada King. Falanqeyntan ayaa horseeday **qorshaha istiraatijiga ah** ee bulshada si ay u taageerto sii wanaajinta natijjooyinka bulshada iyo shucuurta ee carruurta iyo qoysaska. Marka aynu hirgelinayno qorshaha istiraatijiga ah, ayaa waxaan hiigsaneynaa xoojinta adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar ee Degmada King.

### Laga Soo Qaatay Dulmarkeenna Guud

#### Aragtida iyo qiyamka

Aragtida Best Starts waa in ay taageerto ilmo kasta ee ku dhasha ama cunug kasta ee lagu barbaariyo Degmada King in uu gaaro qaangaarnimo farxad leh, caafimaadqab leh, ammaan ah, oo kobcaysa. Sida bar bilow ahaan, xubnaha bulshada ayaa waxay bilaabeen sameynta himilo iyo qiyam la wadaago si ay u hagaan falanqeynteenne iyo hannaanka qorsheynta.

*Waxaannu is-tuseynnaa Degmada King oo qiimeynaysa dedaallada ay wadaan qoysaska si ay u bixiyaan deegaanno daryeel oo loogu talagalay carruurta. Iyadoo ku wajahan yoolkan, ayaa Degmada King waxay kordhineysaa ballanqaadkeedda iyadoo mudnaan siinaysa caafimaadka bulshada iyo dareenka ee dhammaan dhallaanada, carruurta socod-baradka ah, iyo carruurta yaryar (dhalashada ka hor ilaa da'da 5) iyo qoysaskooda.*

Ballanqaadyada iyo qiyamka aasaasiga ah ee mashruucan waxaa ka mid ah **sinnaan, mas'uuliyyad iyo aaminid, adeegyo aadanuhu udub-dhexaad u yahay, wada-shaqeyn, iyo u dhammaansho**.

#### Geeddi-socodkeenna

Mashruucan wuxuu adeegsaday hab loo yaqaanno "cilmii-baarista waxqabadka bulshada." Laga soo bilaabo bishii Jannaayo 2019 ilaa Juunyo 2021, waxaannu sheekoojin ka soo ururinay kooxo kala duwan oo qoysas ah, adeeg-bixiyeyaa, iyo la-hawlgalayaasha bulshada. Annaga oo sheekoojinkan maskaxda ku hayna, ayaa waxaan qoysaska iyo la-hawlgalayaasha bulshada kala shaqayney samaynta macnaha, dejinta ahmiyadaha, qorshaynta, iyo dib-u-eegista warbixintan. Waxaannu degaanahaan kula shaqeynay la-hawlgalayaasha Degmada King iyo mashruuca la midka ah ee gobolka oo dhan.

**Qoysaska Degmada King oo badan ayaa ku lug lahaa mashruucan, oo ay ku jiraan:**



**7 kooxood oo qoysas ka kooban oo arrimo gaar ah isla-falanqeynayey** si ay udub dhexaad ugu noqdaan codadka qoysaska Madowga ah, Asaliga ah, Laatiinta ah, Kongoleeska ah, iyo kuwa Fiitnaameeska ah.



**12-xubnood oo ah Golaha Bulshada** oo ka kooban waalidiinta iyo adeeg-bixiyeyaaasha guud ahaan Degmada King si ay u wadaagaan sawirro iyo sheekoojin laga soo qaata noloshooda iyo waayo-aragnimada ay u leeyihiin Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar.

## **Waa Maxay Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar?**

Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar waxaa muhiim u ah kartida iyo awoodaha carruurta yaryar. Wuxaan dooneynaa in aan xoojinno awoodda ay u leeyihiin:

- in ay dareemaan, muujiyaan, iyo in ay maareeyaan shucuurtooda ama dareenkooda;
- in ay xiriir dhow la yeeshaan carruurta kale iyo daryeelayaasha; iyo
- in ay ka hadlaan oo ay wax ku bartaan gudaha qoyskooda, bulshadooda, iyo dhaqankooda.<sup>2</sup>

Qoysaska iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, iyo sidoo kale xaafadaha, asxaabta bulshada, barnaamijyada waxbarashada carruurta yaryar, iyo bulsho weynta—dadka iyo goobaha nolosha carruurta ayaa dhammaantooda waxay isbeddel ku sameeyaan kobacooda dareen iyo midka bulsho iyo noolal-wanaagga.

### **Qoysaska oo dhan waxay u baahan yihiin taageero si ay carruurta u siiyan aasaas shucuureed iyo mid bulsho oo adag**

Waayo-aragnimada barbaarinta carruurta waxay noqon kartaa wax lagu farxo oo abaal-marin leh, oo sidoo kale ah wax laga walaaco oo adag. Xiriirrada qoyska ayaa bilowda ka hor inta ilmaha uusan imaan waxayna sii socdaan inta ka dhiman noloshiisa.

### **“Bixinta daryeelka la bixiyo in muddo ah” waxaa ku jira waxyaabo badan**

#### **Kor-u-qaadista**

Kor-u-qaadista wacyigelinta waxaa ka mid ah taageerooyinka sida macluumaa wadaagista, baaritaannada koritaanka, iyo kheyraadyo lagu taageerayo xiriirrada daryeelka-cunugga oo xooggan, koritaan caafimaadqab leh, iyo barashada carruurta yaryar. Dhammaan carruurta iyo qoysaskaba waxay u baahan yihiin in ay helaan kor-u-qaadista Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar.

#### **Ka-hortagga**

Waxaa ka mid ah adeegyada gacanta ka geysta wax-ka-qabashada iyo yareynta walaacyada suuragalka ah ee ku saabsan koboca bulsho iyo dareen kuna dhisan awoodaha carruurta yaryar iyo qoyskooda.

#### **Daaweynta**

Waxaa ka mid ah adeegyada caafimaadka ee wax-ka-qabta waxyaabaha aasaasiga ah ee sababa dhaawaca ama qalqal-gelinta wanaagga bulshada iyo dareenka. Yareynta kurbada iyo kordhinta adkeysiga iyo wax-ka-beddelka ayaa gacan ka siin kara carruurta yaryar iyo qoysaskoodaba in ay ku soo noqdaan horumar caafimaad qaba.

## **Laga Soo Qaatay Falanqeyntenna Xaaladda Gaarka ah**



### **Goobjoog ahaw... SHEEKADA SELAM**

*“Annaga oo is-dhinac soonna una soonna goobta tababarqaadashadiisa, ayaa waxaa igu soo jeestay Josiah wuxuunna igu yiri, ‘Hooyo waan ku jeclahay.’ Qalbiga ayaa i qaboobay maxaa yeellay waxaa jiray waxyaabo badan oo aan ka welwelsanaa taasina waxay ahayd markii aan bilaabay in aan diirradda saaro waxa muhiimka ah: in aan la joogo oo aan waqtii tayo leh la qaato wilkeyga.*


*Sida hooyo keligeeda ah oo shaqeysa, waxaa jira waxyaabo badan oo aan ka baqayo in aan si khalad ah u sameeyo: in aanan waqtii isaga la qaadan, in aanan siirin waxa uu u baahan yahay, ama in uu fursadda heli waayo. Waan ogahay in aanan keligeyga ahayn. Shaqadeyda marka aan joogo waxaan hooyooyinka aan la shaqeeyo ka maqlaa waxyaabo la mid ah. Waxaa jirta cabsi guud oo laga qabo dhaawaca qarracan ee ay soo mareen iyo sida uu kaa ugu yeellan karo saameyn muddo-dheer soconaysa. Waqtiyadan oo kale waa muhiim in diirradda la saaro.”*

*–Waalid ku nool Degmada King*

## Waa kuwee carruurta yaryar iyo qoysaska ku nool Degmada King?

- Ku dhowaad **130,000 oo carruur ah** oo ay da'doodu ka yar tahay 5 ayaa ku nool Degmada King.<sup>3</sup>
- **10-kii sano ee ugu dambeeyay ee la soo dhaafey**, kala-duwanaanshaha qowmiyadaha carruurta yaryar ee Degmada King ayaa sii kordhay.
- **In ka badan 20% ee dadweynaha** Degmada King waa qoysas muhaajiriinta ah ama hadba meel u guura.<sup>4</sup>
- **In ka badan 18,000 oo carruur ah** oo ay da'doodu ka yar tahay 5 (14.6%) ee ku nool Degmada King ayaa saboolnimo ku jira.<sup>5</sup>
- **In ka badan 1 qof 4-tii qofba oo uur leh** oo ku nool Degmada King ayaa la kulma niyad-jabka dhalmada ka hor.<sup>3</sup>

Cilmi-baaris ayaa muujinaysa xannuunka dhimirka, in inta lagu guda jiro iyo ka-dib uurka, uu ku badan yahay dadka dhalaya wuxuuna ka dhalan karaa isbeddellada hoormoonta iyo jirka iyo sidoo kale culeyska shucuureed ee isbeddelkan nololeed ee mugga leh.<sup>6</sup>



**“ Waxaan ku dedaalaynaa in aan sii wadno dhaxalkeenna annaga oo la wadaagayna dhagankeenna quruxda badan carruurteenna xitaa marka bulshadu isku-dayayso in ay si kale noo sheegto.”**

- Waalid ku nool Degmada King

## Qoysaska ku nool Degmada King ayaa waxay leeyihii awoodo badan oo loogu talagalay taageeridda carruurtooda yaryar, oo ay ku jiraan:

- Aqoonta koritaanka carruurta.
- Akhris, heesid, iyo la wadaagista carruurtooda fursadaha barashada.<sup>7</sup>
- In ay haystaan qof ay u noqdaan si ay uga helaan taageerada dareenka hawlahaa waalidiinta iyo barbaarinta carruurta.<sup>8</sup>

## Sidaas oo ay tahay haddana waxaa jira caqabado ka hortaagan helidda adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar, sida:

- Qoyska iyo adeeg bixiyeyaasha had iyo jeer ma garanayaan halka ay ka raadsanayaan maclumaaad ama adeegyo.
- Adeegyada oo dhan ma ahan kuwa tayo ahaan, dhaqan aan habboon, ama lagu heli karo luuqadda uu qoysku door-bidayo.
- Degmada oo dhan kama jiraan adeegyo la heli karo oo ku filan daboolidda baahiyada qoyska.
- Gaadiid, saacado aan habboonayn, waqtio sugitaan oo dheer, iyo geeddi-socodyada ayaa abuura caqabado.
- Adeegyadu waxay u baahan yihiin in si wanaagsan la isugu duwo si loo daboolo baahiyada carruurta iyo qoysaskooda.

Taariikh ahaan, carruurta iyo qoysaska qaarkood waxaa ay caqabado badan kala kulmeen helidda adeegyada loogu talagalay Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar. Gudaha nidaamyada hadda jira, dadka Madowga ah, Asaliga ah, qoysaska midabka, muhaajirka, dadka aan ku hadlin Af Ingiriiska, iyo qoysaska bulshooyinka reer-miyiga ah waxaa ay dhammaan caqabado kala kulmi doonaan in baahiyadooda la daboolo.

## Laga Soo Qaatay Qorshaheenna Istiraatijiga Ah

Qoysas badan iyo la-hawlgalayaasha bulshada ayaa gacan ka geystay in ay macno sameeyaan oo ay dejyaan mudnaanaha laga bartay kooxaha arrimaha gaarka ah isla-falanqeynayay. Shanta mudnaano ee ka soo baxay ayaa udub dhexaad u ah himiladooda iyo qiyamkooda. Mudnaan kasta waxay leedahay dhowr istiraatijiyadood iyo tallaabooyin waxqabad oo lagu muujiyay qorshaha istiraatijiga ah ee dheer. Laga bilaabo bar bilowgan, waxaan rajaynaynaa in aan abuurno isbeddellada loogu baahan yahay Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar.



**MUDNAANTA  
1AAD:** Kor-u-qaadista wanaagga bulshada iyo dareenka ee dhammaan carruurta iyo qoysaskooda.



**MUDNAANTA  
2AAD:** Ku-xiridda qoysas badan adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar, oo ay ku jiraan kor-u-qaadista, ka hortagga, iyo daaweynta.



**MUDNAANTA  
3AAD:** Bixinta adeegyo tayo-sare leh, dhaqan ahaanna habboon kuwaas oo daboola baahiyada qoysaska.



**MUDNAANTA  
4AAD:** Taageeridda dhammaan adeeg-bixiyeyaasha tooska ah ee guud ahaan daryelka la bixiyo in muddo ah.



**MUDNAANTA  
5AAD:** Dhisidda iyo xoojinta shabakada adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar ee degmada oo dhan.

## Beddelidda Qaabka Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar: Falanqeynta Xaaladda Gaarka ah iyo Qorshaha Istiraatijiga ah ee Degmada King

Mashruucan wuxuu ahay dedaalo badan socday oo lagu dhageysanayo, baranayo, oo lagu dejinayo mudnaanaha. Istiraatijiyadaha la soo-jeediyay waxaa udub dhexaad u ah carruurta iyo qoysaska waxayna horseedi doonnaan isbeddel qoto-dheer, joogto ah muddo ka-dib. Wuxaan rajo weyn ka qabnaa in shaqadeenna ee naga horreysa in ay saameyn ku yeellan doonto qoysaska, adeeg-bixiyeyaasha, iyo la-hawlgalayaasha bulshada. Dad badan oo u doda Caafimaadka Dhimirka ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar ayaa loo baahan yahay si looga jawaabo baaqyadan wax-ka-qabashada.